

**Sharciga 10 Agoosto 1970, lamba. 42.**

**Ballaarinta awoodda Xeerka lamba. 9 Feberaayo 1970 ee shaqaalaha garsoorka**

**GUDDOOMIYAHA**

**GOLAHA SARE KACAANKA**

Marka uu arkay Xaashida Koowaad ee Kacaanka iyo Xeerka 21 Oktoobar,

Marka uu garowsaday in amarrarada lamba. 9 ee 9 Feberaayo 1970, dabecadda guud ay leeyihiin awgeed, ay tahay waajib in lagu dhaqo dhammaan saraakiisha iyo shaqaalaha Dawladda oo ay ku jiraan shaqaalaha garsoorka;

Marka uu arkay qod. 16 ee Xeerka Nidaamka Garsoorka (Dekereetada Baarlamaan lamba. 3 ee 12 Juun 1962);

Marka uu tixgaliyay baahida loo qabo tallaabo cad oo ku saabsan maaaddada iyadoo fiiro gaara loo yeelanayo shaqaalaha garsoorka;

Marka uu arkay oggolaashaha Golaha Sare Kacaanka;

**WUXUU MEELMARIYAY XEERAAN**

**Qod. 1**

Amarka xeerka 9 Feberaayo 1970 waxaa lagu dhaqyaa shaqaalaha kale ee dawladeed isla awoodahaas, xitaa shaqaalaha garsoorka (garsoorayasha iyo caawiyeyaashooda).

**Qod. 2**

Si loo dabbaqo xeerka ku xusan Qod. 2 ee Xeerka 9 Feberaayo 1970 lamba. 9, garsoorayaashu waxay la mid noqonayaa qaybta A ee shaqaalaha rayidka ee Dawladda.

**Qod. 3**

Waxaa la laalay xeer kasta oo aan la jaan qaadi Karin Xeerkaan.

**Qod. 4**

Xeerkaan waxaa lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga waxaana lagu biirinayaa Uruurinta Rasmiga ee Xeerarka iyo Dekereetooyinka Jamhuuriyadda Demoqaraadiga soomaaliya.

Muqdisho, 10 Agoosto 1970.

Guddoomiyaha  
Golaha Sare Kacaanka  
**S. Gaas Maxamed Siyaad Barre**